

Kobcinta ogaanshaha hore ee kansarka makaanka afkiisa

Sebtember 26, 2024 [Weydiimaha warbaahinta](#)

Dowladda Alberta waxay tijaabinaysaa mashruuc u oggolaanaya reer Alberta inay iska baaraan kansarka makaanka afkiisa iyagoo isticmaalaya qalab guriga loo qaato.

Ogaanshaha hore ee kansarka ayaa muhiim u ah badbaadinta nolosha, iyadoo dowladda Alberta ay sii wadayso inay mudnaanta siiso fursadaha ka dhigaya ogaanshaha hore mid la heli karo oo habboon. Marka ay timaado kansarka afka makaanka, inta badan kiisaska waxaa lagaga hortegi karaa baaris iyo daawayn joogto ah.

Iyadoo qayb ka ah Barnaamijka Baadhitaanka Kansarka afka makaanka, dowladda Alberta, oo ay weheliyaan la-hawlgalayaasha Adeegyada Caafimaadka Alberta (AHS) iyo Shaybaadhka Saxda ah ee Alberta, ayaa bilaabay mashruuc tijaabo ah si loo eego habab cusub oo lagu ballaariyo fursadaha baarista kansarka ee reer Alberta. Mashruuca tijaabada ayaa ku martiqaadi doona dadka reer Alberta ee xaqa u leh inay ka qaybqaataan, oo ay ku jiraan dadka asaliga ah iyo shakhsiyaadka ku nool miyiga iyo bulshooyinka fogfog.

"Waan ognahay in kansarka afka makaanka gebi ahaanba lagaga hortegi karo tallaaf joogto ah iyo baaritaan joogto ah, taasoo ah sababta mashruucan tijaabada ah uu muhiim u yahay. Tani waxay ka dhigan tahay tillaabada xigta ee muhiimka ah ee loo qaadayo dhanka ciribtirka guud ahaan kansarka afka makaanka."

Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka

Baaritaanka is-baarista afka afka makaanka ayaa ah tijaabo saadaalineed marka loo eego baaritaanka joogtada ah ee Muunadda (Pap). Waxay ogaataa noocyada khatarta sare u leh bani-aadanka ee papillomavirus (HPV), iyadoo hore loo ogaanayo shakhsiyaadka khatarta ugu jira inay yeeshaan unugyada afka makaanka aan caadiga ahayn, taasoo u oggolaanaysa daaweyn hore si looga hortago kansarka.

Xirmooyinka tijaabada waxaa ku jira waxyaalaha dadku u baahan yihiin inay si badbaado leh isugu tijaabiyaan guriga ama meel kasta oo ay nefis ku yihiin. Baaritaanka ka dib, xirmooyinka waxaa loo diraa shaybaadhka iyadoo natiijada la siinaayo kuwa bukaanka ah iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka.

Xirmooyin 300 ah ee ugu horreeya ayaa hadda diyaar u ah ka qaybgalayaasha u qalma ee goobta mashruuca tijaabada ugu horreeya ee Edmonton. Kordhinta xagga la-hawlgalayaasha bulshada iyo goobaha miyiga ayaa raaci doona.

"Is-muunad-qaadiddu waxay qofka u oggolaanaysaa in uu muunaddiisa iskaga qaado meel uu dareemaayo ammaan iyo raaxo. HPV-ga iska-qaadista waxay eegaysaa fayraska sababa kansarka afka makaanka. Haddii goor hore la helo, waa la daweyn karaa si uusan u kobcin kansarka afka makaanku."

Dr. Laura McDougall, sarkaal sare oo caafimaadka ah, AHS

Mashruucan tijaabada ah ayaa gacan ka geysan doona horumarinta istaraatiijiyado is-baarista HPV oo wax ku ool ah oo waara oo loogu talagalay dadka aan la baarin iyadoo la ansixinaayo dariiqyada lagama maarmaanka ah iyo borotokoolka lagu ballaarinayo is-baarista afka makaanka ee gobolka oo dhan.

Xaqiiqooyinka degdega ah

- Waxaa Alberta ka jira ilaa 170 ogaanshooyin cusub oo ah kansarka afka makaanka iyo 45 dhimasho oo uu sabab u yahay kansarka afka makaanku sanad walba gudaha Alberta.
- In ka badan 99 boqolkiiba kiisaska kansarka afka makaanka waxaa sababa HPV.
- Kaliya celcelis ahaan 62 boqolkiiba reer Alberta ee xaqa u leh ayaa laga baadhay kansarka afka makaanka intii u dhaxaysay 2021 iyo 2023.
- Wadar dhan 5,000 xirmo ayaa la ururin doonaa inta uu socdo mashruuca tijaabada ah.

Macluumaadka la xidhiidha

- [Barnaamijka Sanduuqa Cilmi-baarista Kansarka ee Baadhitaanka iyo Ka-hortagga](#)

Weydiimaha warbaahinta

Jessi Rampton

587-357-3729

Xoghayaha Warfaafinta, Caafimaadka